# Waa maxay xogta Lala Wadaagaayo Dawladda Federaalka?

homeforward

Marka codsigaaga caawimaada kirada ama guriyeynta ee aad u dirtay Home Forward laga doorto liiska sugeyaasha aadna buuxiso codsiga, Home Forward ayaa laga doonayaa inay xogta soo socota la wadaagto dawlada federaalka.*

## LALA WADAAGO HUD
## (Waaxda Guriyeynta iyo Hormarin Magaallada (Department of Housing and Urban Development))

HUD ayaa kormeerta Barnaamijka Boonada Dookha (Housing Choice Voucher Program). Ilaa iyo inta ugu yaraan qof kamid ah qoyska uu leeyahay xaalada socdaalka ee u qalanta, qoyska ayaa heli kara Boonada. Hase yeeshee, caawimaada kirada ee federaalka ayaa si toos ah u taageeri karin xubnaha qoyska ee aan haysan sharciga socdaalka saxda ah. Home Forward waxaa laga doonayaa inay xogta soo socota ee ku saabsan qoyskaaga la wadaagto HUD:

- ✓ Dhammaan xubnaha qoyska: Magaca, taariikhda dhalashada, dakhliga, magaca loo shaqeeyaha/faahfaahinta shaqada
- ✓ Waa kuwee xubnaha qoyska ee leh xaalada socdaalka ee u qalanta iyo xubnaha qoyska ee aan sheegan inay haystaan aqoonsiga socdaalka ee u qalma
- ✓ Lambarada Social Security ama lambarada dukumiintiga socdaalka ee xubnaha qoyska ee xaalada socdaalka ee u qalanta
- ✓ Ciwaanka meesha aad ku kiraysatay boonada
- ✓ Cadadka kirada aad bixiso

## LALA WADAAGAY DHS
## (Waaxda Amaanka Qaranka)

Home Forward si toos ah uma siiso DHS wax xog ah oo ku saabsan xubnaha qoyska ee aan sheegan inay leeyihiin aqoonsi socdaal oo u qalma, laakiin HUD iyo DHS ayaa wadaaga xogta

DHS ayaa hubisa xaalada socdaalka ee xubnaha qoyska ee leh aqoonsiga socdaalka ee u qalma. Home Forward waa inay la wadaagtaa DHS:

- ✓ Magaca, taariikhda dhalashada, iyo lambarka dukumiintiga socdaalka ee dhammaan xubnaha qoyska ee u qalma

*Abriil 2025*

** Home Forward lama wadaagto dawlada federaalka ah wax xog ah oo ku saabsan dadka codsada laakiin aan la gelin liiska sugeyaasha.*